



---

## SHAQADA: Barnaamijka Qorsheynta iyo Taageerada Dhiiragelinta Shaqada (WIPA)

---

Hay'adda Xuquuqda Naafada ee Ohio (Disability Rights Ohio) waxay mar labaad bixinayaan la-talinta macaashyada, adeeg bilaash ah oo loogu talagalay dadka qaata macaashka Sugnaanta Bulshada iyadoo maadaama ay yihiin dad naafo ah iyada oo loo marayo Maamulka Sugnaanta Bulshada ee Barnaamijka Qorsheynta iyo Taageerada Dhiiragelinta Shaqada (WIPA).

Maamulka Sugnaanta Bulshada (The Social Security Administration) waxay bixiyaan "dhiiragelin shaqo" oo loogu talagalay inuu dadka ka caawiyo ka gudubka helitaanka jeeggaga loogu talagalay dadka si ay lacag ku kasbadaan iyadoo loo marayo shaqada. La-talinta macaashyada ayaa leh yool lagu yaraynayo ama looga takhalusayo ku tiirsanaanta qofka macaashyada dawladda, iyadoo la xalinayo cabashooyinka ay qabaan ee wax looga qabanayo arrimaha sida sii socoshada macaashyada daryeelka caafimaadka.

Isku-duwayaasha Dhiiragelinta Shaqo ee La Xaqijiyyay (CWICs) waxay bixiyaan la-talin la gaar yeelay si ay dadka uga caawiyaan inay isticmaalaan magdhowgan shaqo ayna u fahmaan inay saamayn ku leeyihii shaqada qofka.

Hay'adda Xuquuqda Naafada ee Ohio waxay bixisaa barnaamijka WIPA ee laga helo 31 ka mid ah 88 degmooyin ee Ohio, sida ku qoran liiska ku yaala dhinaca dambe ee boggan. Laba hay'adood oo kale, Ururka Caawinaada Sharciga ee Cincinnati iyo Xarunta Beddelka Xirfadaha, waxay kormeeraan barnaamijyada ka dhacaya gobolada kale.

Maclummaadkooda xiriirkha waxaa laga heli karaa bogga 2.

Si aad u hesho maclummaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka WIPA, fadlan kala xiriir waaxda shaqaale qaadashada ee Hay'adda Xuquuqda Naafada ee Ohio lambarka 800-282-9181, Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxaysa 9 subaxnimo iyo 4 galabnimo.



Dukumeentigan waxaa lagu maalgelinaya heshiiska wadajir ee Sugnaanta Bulshada. Inkastoo Sugnaanta Bulshada dib u egeen dokumentigan inuu saxsan yahay, ma aha mid ka dhigan xiriir rasmi ah ee Sugnaanta Bulshada.

---

**Disability Rights Ohio  
(Hay'adda Xuquuqda Naafada  
ee Ohio)**

200 Civic Center Dr.  
Suite 300  
Columbus, Ohio 43215-4234

614-466-7264 ama 800-282-9181

**FAKIS** 614-644-1888  
[disabilityrightsohio.org](http://disabilityrightsohio.org)

## **Disability Rights Ohio (Hay'adda Xuquuqda Naafada ee Ohio**

Hay'adda Xuquuqda Naafada ee Ohio waxay bixisaa adeegyada WIPA ee gobolada Allen, Ashtabula, Auglaize, Cuyahoga, Darke, Defiance, Erie, Fulton, Geauga, Hancock, Henry, Huron, Lake, Lorain, Lucas, Mahoning, Medina, Mercer, Miami, Ottawa, Paulding, Prostage, Preble, Putnam, Sandusky, Seneca, Shelby, Trumbull, Van Wert, Williams iyo Wood.

200 Civic Center Dr., Suite 300

Columbus, Ohio 43215-4234

Taleefanka: 614-466-7264 ama 800-282-9181

Faakis: 614-644-1888

Mareegta: [disabilityrightsohio.org](http://disabilityrightsohio.org)

## **Southeast**

Xarunta Southeast Inc, Clintonville

3770 N. High Street

Columbus, OH 43214

Taleefanka: (614) 294-7117

Faakis: (614) 294-7443

Barnaamijyada & Adeegyada La Bixiyo

- Adeegyada Macaashka
- Shaqaalaysiinta Dadka Waaweyn
- Adeegyada Dhalinyarada
- Adeegyada Xirfadeed

## **Bulshada Gargaarka Sharciga ee Cincinnati**

Ururka Caawinaada Sharciga ee Cincinnati (Legal Aid Society of Greater Cincinnati) wuxuu bixiyaa adeegyada WIPA ee loogu talagalay gobolada Adams, Brown, Butler, Clermont, Clinton, Fayette, Greene, Hamilton, Highland, Pike, Ross, Scioto iyo Warren.

215 East Ninth Street, Suite 200

Cincinnati, Ohio 45202

Taleefanka: 513-241-9400 ama 800-582-2682 (Khadka Bilaashka Lagu Waco)

TTY: 513-241-1930

Faakis: 513-241-0047

